## BARNAAMIJKA DIB U WARDHADEYNTA

Gudiga waxbarashada waxay ka walwalsan tahay ilaalinta sharafta deegaanka ee koonka. Gudiga waxoo aaminsan yahay in walwalka deegaanka oo u baahan yahay isticmaalka waxtarka leh ee kheyraadka xadidan.

Gudiga waxoo aqoonsan yahay in dhibaatada qashin qubka waxyaabaha adag ay si toos ah u saamayso deegaankeena iyo tayada kheyraadka nolosha. Gudiga waxa kale oo ay aaminsan yihiin in hal shaqo oo dugsiyada tahay in ay tusaale u noqdaan maamulida kheyraadkeena dabiiciga ah iyo in ay hormariyaan muwaadinimad masuula ka ah ardayda. Sidaa darteed, Degmada waxay ku dhaqaaqi doontaa sidii ay ilaalinta kheyraadka ugu dhigi lahayd qayb muhiim ah oo ka mid ah hawlaha jireed ee degmada.

Dadaalkeeda lagu hagaajinaayo iyo lagu dhiirigelinaayo maaraynta qashinka waxyaabaha adag ee dugsiga iyo bulshada dhexdeeda, Gudiga waxoo taageeraa barnaamijka dib u warshadaynta iyo dib u isticmaalka alaabta la isticmaalay. Gudiga waxoo farayaa Kormeeraha Guud ee Dugsiyada inoo hormariyo iyo hirgeliyo barnaamijka dib u warshadaynta Degmada oo dhan kaas oo tixgelin doono kuwa soo socdo:

1. ilaalinta kheyraadka, oo ay ku jiraan dhimista qashinka, iyo dhiirigelinta isticmaalka dhamaan alaabta ilaa xadkooda ka hor inta aan la tuurin;

2. yaraynta isticmaalka alaabta aan burburi karin mar kasto oo ay suurtogal tahay;

3. kala bixinta qashinka burbiri karo iyo kuwa aan burburi karin

4. kala soocida waxyaabaha qashinka ee qaybaha dib u warshadaynta (sida, xaanshada, dhalooyinka, aluminiumka, birta, balaastigada, eQashinka, iwm.) iyo gaarsiinta alaabtaas hay'ad dib u warshadayn oo ku haboon iyada oo lala kaashanaayo dadaalada dib u warshadaynta ee bulshada dhexdeeda;

5. mar kasto oo dhaqaale ahaan lagu shaqayn karo, gadashada iyo/ama isticmaalka alaabta dib loo isticmaali karo; iyo

6. ka qaybgalka ardayda iyo shaqaalaha Degmada ee dhamaan heerarka kala duwan ee barnaamijka dib u warshadaynta. Ka qaybqaadashada noocaan oo kale ah waa in ay tixgelisaa wixii welwel ah ee quseeyo caafimaadka, amaanka, iyo maaraynta qatarta.

Qoraal Xassus: Siyaasadii hore, Buuga Siyaasada, Dib u warshadaynta (Diseembar 6, 1990); Dib loo eegay Agoosto 20, 1998; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 555

ct/sg